

OFFICIAL

Dadka degan
Victoria Street iyo Holland Court
FLEMINGTON

Mudanaha/Marwada guriga degan

Waxaan qoraalkan kuugu soo qoraynaa in aan kula socodsiiino halka ay marayaan howlihii Guryo Dhisida ee Homes Victoria iyo barnaamijka dib u dhiska saraha dhaadheer.

Marxaladdii xigtay ee barnaamijka ayaa hadda ka socota 7 goobood oo cusub. Taasi micnaheedu waxay tahay inay hada meel fiican noo marayaan dhisida aan 9 xaafadood uga dhiseyno guryo loogu talagalay dadka meesha degan hada iyo kuwa mustaqbalka soo degi doonaba guryahaas oo noqon doona kuwo ka fiican, ka amni wanaagsan iyo kana raaxo badan guryihii hore.

Warka maanta la shaaciyay wuxuu saameyn doonaa saraha dhaadheer ee ku yaal xaafadaada inagoona si joogto ah ula soo xiriiri doona dadka degan guryahaas. **Wax saamayn ah kuma yeelanayso dhismaha aad degan tahay ama gurigaaga.**

Waxyaabaha maanta lagu dhawaaqay?

Maanta, waxaan marxaladan xigta kala hadalnay dadka deggan dhismayaashan:

- 25 iyo 27 King Street, Prahran
- 150 Inkerman Street, St Kilda
- 150 Victoria Avenue, Albert Park
- 159 Melrose Street, Waqooyiga Melbourne
- 29 Crown Street, Flemington
- 94 Ormond Street, Kensington

Laga bilaabo bisha Luulyo 2026 ilaa bisha Febraayo 2028, waxaan si dhow ula shaqayn doonnaa qoysaskan si aan uga caawinno inay u guuraan guri ku habboon.

Waxaan guryo cusub ka dhiseynaa meel goobta ka ag dhow

Guryo cusub oo tayo leh ayaa durbaba laga bilaabay in laga dhiso meel goobta ka ag dhow si ay uga taageeraan dadka meesha degan fursadaha dib-u-dejinta. Waxaa la filayaa in la dhammaystiro sanadkan waxaana ka mid ah:

- Essex Street, Prahran
- Barak Beacon, Port Melbourne
- Simmons Street, South Yarra
- Holland Court, Flemington

In guryahan la qaboojiyo lana kululeeyo waa ay ka sahlanaan doonaan kuwii hore, dadka ay ku adag tahay dhaqdhaqaaqana way u fududaan doontaa, waxay kaloo lahaan doonaan amni aad u sarreeya, iftiin iyo hawo ay guyaha helayaan intaasna waxaa usii dheer inay leeyihiin balakoono iyo qolal kuu gaar ah oo dharka lagu dhaqdo.

Xaafadaada dhexdeeda

Waxaanu taageeraynaa tiro yar oo reero ah oo ku haray 12 Holland Court iyo 120 Racecourse Road sidii loo dhameystiri lahaa guuritaankooda. Inta aan isu diyaarinayno inaan bilowno burburinta, waxaan sidoo kale ka fiirsaneynaa talooyinka ay bulshada nala soo wadaagtay ee la xiriira naqshadeynta guryaha cusub. Aragtida fog ee aanu leenahay waa guryo cusub oo tayo leh oo ku yaal xaafad si fiican loo nashqadeeyey iyo xaafado si fiican iskugu wada xiran.

Dhanka kale, guryaha cusub iyo xarumaha bulshada ee ku yaal dhismaha cusub ee Holland Court ayaa la filayaa in la dhammaystiro sanadkan, waxaana dhawaan idinla wadaagi doonnaa naqshadaha barxada weyn (5000 square metre) ee central park, ee sidoo kale la filayo in la dhammaystiro sanadkan.

Xog ku saabsan barnaamijka dib-u-dhiska

Saraha dhaadheer ee Melbourne xilliyo hore laga dhisay waxaa lagu beddeli doonaa guryo cusub oo buuxiya heerarka casriga ah ee raaxada, gelitaanka, iyo koronto dhaqaaleynta. Marka dib loo dayactiro dhismeyaalkan, waxaan xaqiijinaynaa in dadka degan guryahaas ay ku noolaan karaan guryo ammaan ah, raaxo leh, oo ku habboon baahidooda hadda taagan iyo tan mustaqbalkaba.

Nagu xirnoow oo la soco wixii soo kordho

Gurigaaga qayb kama aha barnaamijka dib-u-dhiska saraha dhaadheer, laakiin waxa laga yaabaa inaad aragto isbedelo ka dhacaya xaafadaada. Waan kula soo socod siin doonaa wixii ku soo kordha marxalad kasta oo mashruuca ah.

Waxa kale oo aad booqan kartaa websaydkeena homes.vic.gov.au si aad u aragto waxa howlaha aaggaaga ka socda aadna isku diiwaan geliso si aad u hesho wixii war u dambeeyay ee soo kordhay.

Mahadsanid

Simon Newport

search **homes victoria**



homes.vic.gov.au



Madaxa Fulinta
ee Homes Victoria

28/01/2026

search **homes victoria**



homes.vic.gov.au

